# Habraaca Cabashada Title VI

Qof kasta oo aaminsan in isaga ama iyada, shakhsi ahaan, ama xubin ka tirsan koox gaar ah, lagu sameeyay takoor ku salaysan isir, midab, wadanka u dhalashi, jinsi, da'da, LEP, ama naafonimo wuxuu ka xaraysan karaa cabasho Xafiiska AOT ee Xuquuqda Madaniga iyo U Hogaansanaanta Shaqada.

Cabashooyinka la xiriira takoorka barnaamijka Title VI waxa lagu soo gudbin karaa onlayn iyada oo laga helayo Foomka Cabashada Title VI (https://tinyurl.com/aottitlevi) Marka la gudbiyo, Isku-duwaha Title VI ee AOT wuxuu la xiriiri doonaa qofka cabanaya. Si aad ugu gudbiso cabashada Title VI ee boostada, iimaylka, ama telefoonka, macluumaadka xiriirka waa sida soo socota:

Patricia Martin, Title VI Coordinator
Wakaalada Gaadiidka ee Vermont
Xafiiska Xuquuqda Madaniga iyo U
Hogaansanaanta Shaqada
219 North Main Street
Barre, VT 05641

Iimaylka:
patricia.martin@vermont.gov
Talefoonka: 802.595.6959

Cabashooyinka qoraalka ah waa inuu saxeexaa qofka cabanayaa. Dacwooyinka lagu soo gudbiyo taleefoonka ama iimaylka iyo cabashooyinka qoran ee aan saxeexin waa in ay raacaan cabasho qoraal ah, oo uu saxeexo cabashada ama wakiilkiisa 10 maalmood oo shaqo gudahooda ee cabashada hore ee hadalka ah/elektarooniga ah/cabashada aan la saxeexin. Waydiimaha lagu soo gudbiyay iimaylka waa laga jawaabaa waana la raadraacaa. Haddii cabashada u baahan yahay in laga caawiyo soo gudbinta dukumeenti qoran, xubin ka tirsan Xafiiska AOT ee Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah ayaa waraysan doona cabashada oo ka caawin doona qofka inuu u badalo cabashada hadal ah mid qoraal ah. Dhukumiintigan waa inuu saxeexaa
qofka cabanaya ama wakiilkiisa/keeda. Sharciyada dawlada dhexe iyo kuwa gobolka ayaa dalbanaya in cabashada lagu xareeyo 180 maalmood gudahooda laga bilaabo dhacdada takoorka lagu eedeeyay.

Marka cabashada qoraal ahaan loo gudbiyo, AOT waxay qaadi doontaa talaabooyinka soo socda si ay wax uga qabato cabashada:

1. Cabashada waxaa lagu qori doonaa Diiwaanka Cabashada Title VI ee AOT ee uu hayo Xafiiska AOT ee Xuquuqda Madaniga, iyadoo la aqoonsanayo magaca cabashada, taariikhda dhacdada, waxyeelada la sheegay, iyo macluumaadka la xiriira macluumaadka dadka ee ku saabsan cabashada.

2. Iskuduwaha Title VI ee AOT wuxuu buuxin doonaa Foomka Cabashada Title VI (eeg boga 29).

3. Macluumaadka muhiimka ah ee foomka waxaa kamid ah waxyaabaha soo socda:
    a. Taariikhda dhacdada taas oo ah ujeedada cabashada;

b. Wakhtiga dhacdada;

c. Goobta ay dhacdadu ka dhacday; iyo

d. Xaaladaha shilka oo faahfaahsan inta faahfaahin ah ee ugu badan ee la heli karo, oo ay ku jiraan sharraxaadda arrimaha iyo magacyada iyo magacyada shaqada ee shakhsiyaadka loo arko inay yihiin dhinacyada cabashada.

4. Foomka la buuxiyay, oo ay la socoto warqada cabashada hore iyo soo koobitaanka xiriir kasta oo kale, waxaa loo gudbin doonaa Xafiiska Qeybta FHWA Vermont si loo soo gudbiyo Xarunta Dhexe ee FHWA Xafiiska Xuquuqda Madaniga (HCR) ee Washington, DC.

5. FHWA HCR ayaa go'aansata haddii la aqbalo, la diro, ama la wareejiyo cabashada. Marka FHWA HCR ay go'aansato in ay aqbasho, eryi doonto, ama wareejinayso cabashada, FHWA HCR waxay ogaysiin doontaa cabashada, Xafiiska Qaybta FHWA Vermont, AOT, iyo ka faa'iidaystayaasha hoose (markay jiraan). Waxaa jira afar natiijo oo suurtagal ah oo lagu xalinayo cabashooyinka:

    <u>Aqbal</u>: Haddii cabashada wakhtigeeda la xareeyo, oo ay ka kooban tahay macluumaad ku filan oo lagu taageerayo dacwadda hoos timaada Title VI, oo ay khusayso arrimaha hoos yimaada awoodda FHWA, kadib HCR waxay u diri doontaa cabashada, AOT, iyo Xafiiska Qaybta FHWA ogaysiis qoraal ah oo ah inay aqbashay cabashada baaritaan.

    <u>Dib u eegista hordhaca ah</u>: Haddii aysan cadayn in eedeymaha cabashada ay ku filan yihiin inay taageeraan sheegashada hoos timaada Ciwaanka VI, markaas HCR waxaa laga yaabaa (1) inay diido ama (2) ay uga qeybgasho dib u eegis horudhac ah si ay macluumaad dheeraad ah uga hesho cabashada iyo/ama jawaab bixiyaha ka hor inta aysan go'aansan in aqbal, diido, ama u gudbi cabashada.

    <u>Diidmo Habraac ahaaneed</u>: Haddii cabashada aan wakhtigeedii lagu xaraynin, aan lagu qorin oo aan saxiixin, ama ay muujiso cillado kale oo habraac/waxbarasho ah, markaas FHWA HCR waxay u diri doontaa cabashada, AOT, iyo Xafiiska Qaybta FHWA ogaysiis qoraal ah oo sheegaya inay meesha ka saarayso cabashada.

    <u>Gudbin\Laalitaan</u>: Haddi ay cabashadu ku filan tahay habraacan balse FHWA (1) ay ka maqantahay awood sharci ahaaneed mawduuca ama (2) ay ka waydo awooda cida la dacweeyay, markaas FHWA HCR waxay burin doonta cabashada ama waxay u gudbin doontaa wakaalad kale oo awood u leh. Haddii FHWA HCR ay diido cabashada, waxay usoo diri doontaa cabashada, AOT, iyo Xafiiska Qaybta FHWA nuqul ogaysiis qoraal ah oo diidmo ah. Gudbinta, FHWA waxay soo diri doontaa ogaysiis qoraal ah oo nuqul ee cabashada ay ku socoto hay'ada Dawlada dhexe ee saxda ah iyo nuqul Xafiiska Waaxda USDOT ee Xuquuqda Madaniga ah.

6. Cabashada waxaa loo laali karaa sababaha soo socda awgood:

    a. In ka badan 180 maalmood ay kasoo wareegtay dhacdada lagu eedeeyay iyo xaraynta cabashada hore.

    b. Eedayntu kuma lug laha waxyaabaha lagu daboolayo Title VI, sida isir, midab, wadanka u dhalasho, da'da, jinsi, LEP, ama naafo.

c. Eedayntu kuma lug laha AOT ama mid k mid ah dadka ka hoos shaqeeya maaliyada dawlada dhexe.

d. Cabashadu waxay ku guuldaraysatay inay ka jawaabto codsiyada soo noqnoqda ee macluumaadka dheeraadka ah ee loo baahan yahay si looga shaqeeyo cabashada.

e. Qofka cabanaya lama heli karo isku dayo macquul ah kadib.

7. FHWA HCR ayaa mas'uul ka ah inay sameyso dhamaan baaritaanada Waaxda Gaadiidka Gobolka iyo dadka kale ee aasaasiga ah. Hadii cabashada laga gudbiyay ka faa'iidaystaha hoosaad, FHWA HCR ayaa laga yaabaa inay iyadu iyadu samayso baaritaanka lafteeda, ama waxay u igman kartaa baaritaanka gobolka DOT ee aasaasiga ah. Hadii ay HCR doorato inay u wakiisho baadhista cid ka hoosaysa, HCR waxa ay aqbashay cabashada la xiriira doonta cabashada iyo jawaab bixiyaha, laakiin Iskuduwaha Title VI ee AOT ayaa qaban doona dhamaan codsiyada xogta, waraysiyada, iyo taxliilinta.

   Haddii baaritaanka uu qabanayo Iskuduwaha/Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah ee AOT ee Title VI, waa in lagu dhameeyaa 60 maalmood gudahooda marka la helo ergada FHWA.

   Haddii FHWA HCR ay samaynayso baaritaanka, ma jiro wakhti sharci ah, laakiin FHWA waxay ku dadaalaysaa inay ku dhamaystirto dhammaan hawlaha 180 maalmood laga bilaabo taariikhda la aqbalay.

8. Haddii baaritaanka uu sameeyo Iskuduwaha Title VI ee AOT, Iskuduwaha Title VI wuxuu abuuri doonaa Warbixinta Baaritaanka (ROI), kaas oo loo diri doono FHWA HCR. HCR waxay dib u eegi doontaa ROI oo waxay samayn doontaa Warqad Natiijada ku salaysan ROI.

Wakaalada Gaadiidka ee Vermont

## Habraaca Cabashada ADA

Qof kasta oo aaminsan in lagu sameeyay takoorid ku salaysan naafanimo, shakhsi ahaan, ama xubin kamid ah nooc kasta oo dad gaar ah, wuxuu u gudbin karaa cabasho Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah ee Wakaalada Gaadiidka ee Vermont.

Dhamaan cabashooyinka la xiriira takoorka naafonimo waa in lagu hagaajiyaa Patricia Martin, ADA & Iskuduwaha Title VI, Wakaalada gaadiidka Vermont (AOT), Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah. Cabashooyinka waxaa lagu soo gudbin karaa si elektaroonig ah, talefoon, fakis, ama Adeega Boostada Mareykanka (USPS), sida soo socota:

- Elektoroonig ahaan websaytka AOT: https://tinyurl.com/aotada
- Iimaylka: AOT.CRADA@vermont.gov
- Telefoonka: 802.595.6959
- Patricia Martin, ADA & Title VI Coordinator
    - Wakaalada Gaadiidka ee Vermont
    - Office of Civil Rights
    - 219 North Main Street
    - Barre, VT 05641

Dhamaan shakhsiyaadka u soo gudbiya Cabashada ADA AOT waxaa lala xiriiri doonaa sadex (3) maalmood oo shaqo gudahooda laga bilaabo soo gudbinta cabashada. AOT waxaa ka go'an in ay bixiso jawaabo iyo habraac xalin siman oo degdeg ah dhamaan cabashooyinka iyo walaacyada ADA. Haddii shakhsi u baahan yahay caawimo si uu cabasho u gudbiyo, Iskuduwaha AOT ADA ama xubin kale oo ka tirsan Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah ee AOT ayaa ka caawin doona shakhsiga gudbinta cabashada. Sharciga dawlada dhexe iyo gobolka ayaa dhigaya in cabashada lagu xareeyo 180 maalmood gudahooda laga bilaabo dhacdada takoorka lagu eedeeyay.

Marka cabashada la gudbiyo, AOT waxay raaci doontaa talaabooyinka soo socda si ay wax uga qabato cabashada:

1. Qofka cabanaya waxaa lala soo xiriiri doonaa sadex (3) maalmood oo shaqo gudahooda ka dib marka la soo gudbiyo waxaana la siin doonaa sharraxaad ku saabsan habka iyo waxa la siinayaa hagitaan iyo caawimo lagu xalliyo mawduuca cabashada.

2. Isku duwaha AOT ADA ayaa bilaabi doona Foomka Cabashada.

3. Macluumaadka muhiimka ah ee foomka waxaa kamid ah waxyaabaha soo socda:

    a. Taariikhda dhacdada taas oo ah ujeedada cabashada;
    b. Wakhtiga dhacdada;
    c. Goobta ay dhacdadu ka dhacday; iyo
    d. Xaaladaha shilka oo faahfaahsan inta faahfaahin ah ee ugu badan ee la heli karo, oo ay ku jiraan sharraxaadda arrimaha iyo magacyada iyo magacyada shaqada ee shakhsiyaadka loo arko inay yihiin dhinacyada cabashada.

4. Foomka la buuxiyay, oo ay weheliso warqada cabashada hore iyo koobitaanka xidhiidh kasta oo kale, ayaa loo gudbin doonaa Agaasimaha Xuquuqda Madaniga ee AOT si uu u eego. Agaasimaha Xuquuqda Madaniga ayaa go'aamin doona awooda iyo aqbalida cabashada iyo baahi kasta oo loo qabo macluumaad dheeraad ah. Kadib marka la soo iibiyo macluumaad dheeraad ah, Agaasimaha Xuquuqda Madaniga ayaa go'aamin doona in la aqbalo ama la diido cabashada.

5. Qofka dacwoonaya waxaa la siin doonaa ogeysiin qoraal ah oo ah in AOT ay aqbashay ama ay diiday cabashada.

6. Cabashada waxaa lagu diidi karaa sababaha soo socda awgood:

a. In ka badan 180 maalmood ay kasoo wareegtay dhacdada lagu eedeeyay iyo xaraynta cabashada hore.
b. Eedeymaha kuma lug laha naafo.
c. Eedeymaha kuma lug laha VTrans ama mid ka mid ah dadka qaata lacagaha federaalka.
d. Cabashadu waxay ku guuldaraysatay inay ka jawaabto codsiyada soo noqnoqda ee macluumaadka dheeraadka ah ee loo baahan yahay si looga shaqeeyo cabashada.
e. Qofka cabanaya lama heli karo isku dayo macquul ah kadib.

7. Cabashada la aqbalay ayaa loo samayn doonaa nambar kiis waxaana lagu gali doonaa kaydka xogta iyo Diiwaanka Cabashada AOT ADA ee uu hayo Xafiiska AOT ee Xuquuqda Madaniga, iyadoo la aqoonsanayo magaca cabashada, taariikhda dhacdada, iyo macluumaadka ku saabsan dhacdada lagu eedeeyay.

8. Iskuduwaha AOT ADA, oo ay caawinayaan xubnaha kale ee Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah ee loo tababaray baadhista cabashada, ayaa bilaabi doona baadhista cabashada, oo ku dhamaystiri doona warbixinta mudo aan ka badnayn 45 maalmood gudahooda marka la aqbalo cabashada. Warbixintu waa inay ku jirtaa sharraxaad ka sheekayn dhacdada, aqoonsiga dadka la waraystay, natiijooyinka, iyo talooyinka ku saabsan dabeecada.

9. Warbixinta waxaa dib u eegi doona Agaasimaha Xafiiska AOT ee Xuquuqda Madaniga oo loo gudbin doonaa Qaybta Sharciga ee AOT, haii loo arko inay habboon tahay. Agaasimuhu wuxuu aqbali doonaa ama diidi doonaa talada ku-dhaqanka, isagoo la tashanaya sarkaalka sharciga, iyo hadii shakhsiyaadka ku lugta leh lagu helo inaysan u hogaansamin shuruudaha Barnaamijka ADA, talaabooyinka hagaajinta ayaa la go'aamin doonaa.

10. Natiijooyinka baaritaanka iyo go'aanka agaasimaha waxaa loo diri doonaa cabashada. Ogeysiiska waa in lagu daraa macluumaadka ku saabsan xuquuqda rafcaanka ee qofka dacwoonaya iyo tilmaamaha bilowga racfaanka. Ogeysiiska racfaanku waa sida soo socota:

a. AOT waxay dib u eegi doontaa go'aanka hadii xaqiiqooyin cusub ay soo baxaan.
b. Hadii cabashadaha aanu ku qanacsanayn go'aanka iyo/ama xalinta ay dejisay AOT, isla cabashada waxaa loo gudbin karaa hay'ada federaalka ee ku haboon ee hoos ku qoran:

Federal Transit Administration (FTA) Office of Civil Rights
1200 New Jersey, S.E. 5th Floor TRC East Building
Washington, DC 20590
Talefoonka: 202.366.4043
ama
Federal Highway Administration (FHWA) Vermont Division
87 State Street, Suite 216
Montpelier, VT 05602
802.828.4423

11. Nuqul ka mid ah cabashada iyo warbixinta baaritaanka AOT, warqada helitaanka, iyo qorshe hawleedka dib u hagaajinta ayaa lagu soo gudbin doonaa 120 maalmood gudahooda laga bilaabo helitaanka hore ee cabashada hay'ada ku haboon ee kor ku xusan.

12. AOT waa in ay xafidaan hal sano dhamaan cabashooyinka ku saabsan u hogaansanaan la'aanta la helay, iyo diiwaanka dhamaan cabashooyinka noocaas ah ee faylka shan sano, iyadoo la raacayo 2 CFR Qaybta 200.334, Jadwalka Diiwaanka Guud ee Gobolka Vermont GRS-1000.1102, iyo Wareegtada ADA 4701.1, Qaybta 12.7.3.

Wakaalada Gaadiidka ee Vermont

## Foomka Cabashada

Waxaan aaminsanahay in la igu sameeyay (ama qof kale) la igu takooray iyadoo lagu salaynayo: (Xulo dhamaan kuwa ku haboon):
Isirka _____ Midab ____Wadanka u Dhalasho _____ Naafonimo _____ Wax kale_____________

Magaca Koobaad: ________________________ Magaca u Dambeeya: ____________________

Cinwaanka Deegaanka: ____________________________________________________

____________________________________________________________________________

Magaalada:___________________ Gobalka:_________________ Koodhka boostada:________

Talefoonka:___________________Iimaylka: ________________________________________

Taariikhda cabashada:____________ Taariikhda iyo wakhtiga takoorka lagu eedeeyay: _______

Goobta ay dhacdadu ka dhacday: _______________________________________________

____________________________________________________________________________

U sharax sida ugu macquulsan waxa dhacay iyo sababta aad u aaminsantahay in lagu takooray. Ku dar magaca iyo macluumaadka qofka (dadka) kugu takooray (hadii la garanayo) iyo sidoo kale magacyada iyo macluumaadka xiriirka markhaati kasta.: ___________________________

____________________________________________________________________________

____________________________________________________________________________

____________________________________________________________________________

____________________________________________________________________________

____________________________________________________________________________

**Magaca wakaalad cabashadani waa ka dhan: _________________________________**

Qofka lala xidhiidho ee wakaalada:_________________________________________________

Jagada/Booska qofka lala xiriirayo: _______________________________________________

Talefoonka:_______________________________________________________________

Horaan ma uga xaraysay cabashada Title VI ee ADA wakaaladan? Haa _____ Maya _____

Fadlan ku dar wixii macluumaad dheeraad ah ee khuseeya cabashadaada: __________________

____________________________________________________________________________

Wakaalada Gaadiidka ee Vermont

Ma waxaad u xaraysanaysaa cabashadan naftaada? Haa _____ Maya _____ Haddii ay maya tahay, fadlan bixi macluumaadka soo socda:

Magaca qofka aad u buuxinayso: ____________________________________________

Xiriirka kaala dhexeeya qofka aad u buuxineyso: ________________________________

Fadlan sharax sababta aad cabashadan ugu gudbinayso dhinaca sadexaad:___________

________________________________________________________________________

Ma heshay ogolaanshaha qofkaas si aad u gudbiso cabashadan? Haa _____ Maya ____

Ma u gudbisay cabashadan mid kale oo dawlada dhexe, gobol, ama wakaalad deegaanka ah, ama maxkamd dawlada dhexe ama heer gobol ah? Haa _____ Maya _____ Haddii ay haa tahay, fadlan bixi macluumaadka soo socda:

Magaca Wakaalada:_____________________________________________________

Qofka lala xidhiidho ee wakaalada:_________________________________________

Jagada/Booska:________________________________________________________

Cinwaanka Deegaanka:__________________________________________________

Magaalada:______________ Gobalka:_________________ Koodhka boostada:________

Talefoonka:_______________Taariikhda cabashada la xareeyay:___________________